

## **Somali**

### **Kooxaha jimicsiga ee carruurta iyo dhalinyarada**

#### **Toddobaadyada 36–49 iyo 2–18**

Kooxaha waxaa loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada u baahan taageere gaar ah xagga dhaqdhaqaaqa jirka, kuwaas oo raadinaya madadaallo ay jecelyihiin. Toddobaad kasta waxa jira kooxo jimicsi oo kala duwan oo aad kala kulmi karto farxad iyo rayn-raynta jimicsiga. Kaalay oo ka qayb qaado jimicsiga, qoob ka ciyaarka, ciyaaraha iyo dabaasha!

Macluumaad dheeri ah: [turku.fi/soveltavaliikunta](https://turku.fi/soveltavaliikunta) -> buugga xilliyeedka ee kooxaha jimicsiga ee carruurta.

### **Jimicsi samee inta lagu jiro maalinta iskuulka**

Xirfadaha jimicsiga aasaasiga ah iyo dhaqdhaqaaqyada la taaban karo gudaha iyo dibadda! Jimicsiga madadaallada bilaashka ah waxaa la abaabulaa maalmaha dugsiga ee toddobaadyada 36-49 iyo 2-18 (ma aha xilliyada fasaxa iskuulka) Weydii maamulaha naadiga iskuulka ama macallinka ilmahaaga wixii ku saabsan madadaallada iskuulkaaga.

Waxaad ka heli kartaa madadaallada gaarka ah ee iskuulka oo la soo koobay: [turku.fi/harrastelukkarit](https://turku.fi/harrastelukkarit)

### **Qalabyada KouluPT iyo KouluPCAC**

Qalabka Koulu Personal Trainer (KouluPT) waa jimicsi iyo hagitaan oo loogu talagalay ardayda dugsiga dhexe, halkaas oo dhalinyarada lagu dhiirigeliyo inay kordhiyaan firfircoonida hawl maalmeedkooda iyagoo taageeraya dhinacyada kala duwan ee nolol-wanaagga.

Qalabyada Koulu Personal Culture & Arts Coach (KouluPCAC) waa hagitaan fanka iyo dhaqanka ee ardayda dugsiga dhexe, kaas oo ujeedadiisu tahay in la kordhiyo dhaqanka iyo caawinta dhalinyarada sidii ay u heli lahaayeen jidka fanka iyo dhaqanka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan iskuullada iyo waxqabadyada: [turku.fi/harrastamisen-turun-malli](https://turku.fi/harrastamisen-turun-malli)

## **MIHI**

### **Toddobaadyada 36-49 iyo 2-18 (ma aha toddobaadka 8).**

MIHI waxa ay 12-19 jirka ee Turku ku siisaa ka badan 40 kulan oo isboorti bilaash ah. Isboorti badan oo shaqsi iyo kooxeed ayaa la helayaa. Isboortiga ka sokoow waxaad iskaa ugu taraarixi kartaa barafkaa iyo iskiinka Impivaara (qalabyada waa bilaash). Intaa waxaa dheer, inay dhalinyaradu fursad u haystaan inay ballan qabsadaan kubadda koleyga ah ee iskuullada Turku. Uma baahnid inaad hore isaga sii diiwaan galiso MIHI (marka laga reebo ciyaaraha billiard-yada iyo laysarka).

Macluumaad dheeri ah: [jorma.fisk@turku.fi](mailto:jorma.fisk@turku.fi) ama tel. 050 554 6250  
Fiiri: [mihi.fi](https://turku.fi/mihi)

### **Madadaallo baarista ee iskuullada**

Iskuullada hoose-dhexe oo badan ee Turku ah ayaa qabanqaabiya madadaallo raadin ah. Adeegga waxa loogu talagalay ardayda iskuullada aada ee aan weli helin wax ay qabtaan wakhtiga firaaqada ee ay jecel yihiin. Xidhiidhiyaha iskuullada ee madadaallo raadiyaha wuxuu caawiyaa oo kula taliyaa ardayda inay helaan hiwaayad macno leh.

Macluumaad dheeri ah: [turku.fi/koulujen-etsiva-harrastustoiminta](https://turku.fi/koulujen-etsiva-harrastustoiminta)